IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIAH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad · Muqdisho, 25.12.1977 L. 3R 12

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 77 ee 12 Nof. 77, Dhisid Guddi loo xilsaaray inuu mas'uul ka noqdo Qorsheynta Habeynta iyo ururinta maalka Ummadda. Bogga 1262

SHARCI L. 78 ee 12 Nof. 77 Heshiiska amaahda ee lagu dhisayo Jidka Hargeysa, Boorama, dhexmarayana J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA). » 1263

SHARCI L. 78 ee 12 Nof. 77. The development credit Agreement between the Somali Democratic Republic, and the International Development Association. » 1264

SHARCI L. 79 11.Dis: 77. Sharciga isu diyaarinta Difaaca dalka. » 1265

### BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 12 Nof. 77, Xeer lagu Magacaabay Xubno Guddi L. 94 » 1268

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

XEEER MADAXWEYNAHA JDS ee 12 Nof. 77, Xeer lagu Magacaabay Guddoomiyaha Qorsheynta Qaranka L. 95 » 1269

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 12 Nof. 77, Xeer lagu Magacaabay Gudoomiyayaal Hogaanno iyo Ku Xigeenno L. 96 » 1270

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 23 Okt. 77, Cad dhul Dawladeed la siiyey Cambaro Wardheere Cigaalle - ku yaal Muq. - Degmada Wadajir kuna fadhiya mq. 940,50 L. 97 » 1272

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Okt. 77, Cad dhul Dawladeed gadatay J.le Canab - Xuseen Weyd ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan - Waddada 26ka Juunyo - kuna fadhiya mq. 600. - L. 98 » 1274

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 1.11.77, Naado Dhul Jaalle Cali Xirsi Maxamuud L. 665 » 1276

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 1.11.77, Naado Dhul Jaalle Cabdulla Diiriye Maxamuud L. 666

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 1.11.77, Naado Dhul Jaalle Xuseen Sahal Maxamuud L. 667 » 1277

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Axmed Cabdisalaan Caalin L. 669

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Awees Sheekh Maxamed L. 668 » 1278

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Jaamac Cabdi Faarax L. 670

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Maxamed Warsame Faarax L. 671 » 1279

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Cali Warsame Guuleed L. 672

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Kinsi Ibraahim Cismaan 673 » 1280

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 6.11.77, Naado Dhul Jaalle Axmed Xaaji Maxamed Jaamac L. 674

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 12.11.77, Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Maxamuud L. 675 » 1281



MAXKAMADDA tGOBOLKA BERBERA 15.10.77, lumid Buugga Kaydka L. 1400 ku qoran Shs. 728,33 uu leeyahay Cabdiraxmaan Jaamac Seed L. 676 » 1282

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 23.11.77, lumid Buugga Kaydka L. 12508 ku qoran Sh. So. 3610 uu leeyahay Cabdullaahi Xuseen Mayow L.677

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.11.77, lumid Jeeg wareega L. 017818 ku qoran Sh. So. 20.000./ uu leeyahay Cali Cabdalla Cabduraxmaan L. 678 » 1283

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15.12.77, lumid Buugga Kaydka L. 13153 ku qoran Sh. So. 150 ay leedahay Sureer Axmed Maxamed L. 679

MAXKAMADDA GOBOLKA GALGADUUD

Lumid Jeeg L. 101285 ku qoran Shs. 700, uu leeyahay Maxamed Yaroow Maxamed L. 680 » 1284

BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 77 Dhisid Guddi loo xilsaaray inuu mas'uul ka noqdo qorsheynta habeenta iyo ururinta maalka Ummadda.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIM. SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah: 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976;

IYADOO LA GARTAY: In laga dhex-dhiso Golaha Dhexe X.H.K.S. Guddi Gaar ah;

IYADOO TIXGELIYAY: Go'aanka Shirka aan caadiga ahayn ee Golaha Dhexe X.H.K.S. taariikhdiisuna ahayd 27.10.1977,

WUXUU SOO SAARAYAA:

SHARCIGA SOO SOCDA:-

QODOBKA 1aad

Waxaa laga dhex dhisay Golaha Dhexe ee X.H.K.S. Guddi loo xilsaaray inuu mas'uul ka noqdo qorsheynta, habeynta iyo ururinta maalka Ummadda Soomaaliyeed ugu deeqdo taageerada Jabhadda Gobannimadoonka Soomaaliyeed.

QODOBKA 2aad

Guddigu wuxuu yeelanayaa Guddoomiye iyo Jaallayaal ka ah Xubno oo kurtoodaba ka tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

QODOBKA 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa ka bilaabata 27.10.77, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 12.11.77

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J.D.S.



SHARCI L. 78 ee 12 Nof. 77, Heshiiska amaahda ee lagu dhisayo Jidka Hargeysa Boorama, dhexmarayna J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA).

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Tirsigiisu yahay 1.17.18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) kuna saabsan Jidka Hargeysa - Boorama, lana saxeexay 1dii Juun, 1977.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada ee 3da Nofembar, 1977;

Wuxuu soo saarayaa sharciga soo socda:

QODOBKA 1aad

Heshiiska Amaahda ee lagu dhisay Jidka Hargeysa - Boorama dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee horumarinta (IDA) lana saxeexay 1dii Juun 1977, waa la meelmariyay.

QODOBKA 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 12 Nof. 1977.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J.D.S.

LAW N. 78 on 12 Nov. 77. The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic, and the International Development Association.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN : The 1st, 2nd and 3rd charter of October 21st Revolution 1969;

HAVING SEEN : The law No. 1.17.18 and 19 of 1st July 1976 ;

HAVING SEEN : The Development Credit Agreement (Hargeisa - Borama Road) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA) signed on 1st June 1977.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of the Council of Ministers on 3rd Nov. 1977.
Hereby promulgates the following law:-

Article 1

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association, signed on 1st June 1977, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic, and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 12 Nov. 1977.

Major General Mohamed Siad Barre
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEM. REPUBLIC



SHARCI L. 79 ee 11 Dis. 77. Sharciga isu diyaarinta Difaaca Dalka.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMUQRADIGA SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka;

MARKUU FIIRIYEY : Sharci Lam. 6 ee 22kii Agoosto 1976;

MARKAY U MUUQATAY : Cagajuglaynta isdabajoogta ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya kaga imaaneysa dalalka ay Jaarka yihiin;

MARKUU ARKAY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada;

MARKUU DHAGEYSTAY :Wasiirka Gaashaandhigga;

WUXUU SOO SAARAYAA :

SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Dalkoo geli doona xaalad cabsi dagaal

1. Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, laga bilaabo maalinta uu sharcigani dhaqan galo waxay isu habeyneysaa xaalad baqe dagaal (in a state of danger of war).

2. Dadka, Qalabka, Gaadiidka iyo maalka ummadda Soomaaliyeed, gaarahaan iyo guud ahaanba waxa loo diyaarinayaa oo loo habaynayaa daafacaadda iyo nabadgelyada Qaranka.

Qodobka 2aad

Guddiga Gaadiidka Difaaca

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, wuxuu magacaabi doonaa Guddi ururisa, habaysa, dayactirta oo qaybisa gaadiidka dalka. Madaxweynaha ayaa magacaabi doona Guddoomiyaha iyo xubnaha guddigaas.

Qodobka 3aad

Wacista Gaadiidka wax ka tari kara

Difaaca iyo nabadgelyada dalka

1. Guddiga gaadiidka Difaaca waxaa loo xilsaaray inay ururiyaan, qorsheeyaan, habeeyaan, dayactiraan, si hufanna u qaybiyaan gaadiidka Dalka oo dhan.

2. Guddiga Gaadiidka ee kor ku tilmaamani waxay awood u leeyihiin inay wacaan (requisition) baabuur alla baabuurkay la noqoto in loo isticmaali karayo ama wax ka tari karaya daafacaadda, dhaqaalaha iyo nabadgelyada Qaranka.

3. Baabuurka la waco ee gaar ahaan loo leeyahay (privately owned), wuxuu xaq u yeelan doonaa ama la siin doonaa magdhaw iyo abaalgud u qalma isticmaalkiisa, qaadkiia iyo muddada la isticmaalay.

4. Haddii baabuur ka mid ah kuwa ku tilmaaman xubinta 3aad ee qodobkan lagu baabi'iyo ama waxyeello aanu ka soo kaban kareyn lagu gaadhsiiyo isagoo loo isticmaalayo hawl uu sharcigani tilmaamay, waxaa la siin doonaa magdhaw guda khasaaraha gaarey.

Qodobka 4aad

Baabuurka la wacay marka aanu hawl hayn

1. Baabuurka gaar ahaan loo leeyahay ee aan hawl qaban karayn, waxyeello gaartay intuu wacista ku jiray awgeed, waxaa dayactirayaa ama samaynaaya Guddiga Gaadiidka Difaaca, hase yeeshee xaq uma laha oo la siin maayo abaalgud ama gunno inta uu fadhiyo ama laga shaqeynayo ama aan la isticmaali kareyn. Xubintani waxba u dhimimayso oo ma saameyneyso xuquuqda, gunnada iyo afhaynta shaqaalaha baabuurka.

2. Baabuurka la wacay ee ay gaarto waxyeello ama khasaare uu eededa iska leeyahay dareewalka xaq u yeelan maayo dayactir, samayn, abaalgud ama magdhaw, haddii uu darawalkaasu yahay kii lahaa baabuurka ama kii uu ku aaminay ee uu mas'uulka uga dhigay qofka baabuurka lihi.

Qodobka 5aad

Wacista Farsamayaqaannada iyo Dareewallada Baabuurta.

1. Guddiga Gaadiidka Difaaca ama cid ay wakiisheen, waxay awood u leeyihiin inay wacaan qof alla qofkii yaqaan Farsamada Baabuurta (Mechanic) ama dareewal ah ee ay la noqoto in looga baahan yahay ama gacan siin karaya kaxaynta, samaynta ama dayactirka Gaadiidka Difaaca Dalka.

2. Wacistu waxay noqon kartaa af ama qoraal. Qof kasta oo ka mid ah dadka la wacay wuxuu xaq u leeyahay wuxuu quuto iyo wixii kalee ay u garato guddigu.

3. Qofka loogu yeeray sida ku tilmaaman xubinta kore waxa hawl looga diri karaa meel alla meeshii looga baahan yahay ee ka mid ah Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya ama meeshii kale ee Guddiga Gaadiidka Difaaca u garato.



Qodobka 6aad

C I Q A A B

1. Qofka loo wacay hawsha Gaadiidka Difaaca ama wada ama leh gaadiid loogu baahday Difaaca Dhaqaalaha iyo Nabadgelyada Qaranka ee diida dhuunta ama qariya gaadiidkiisa, markii la wacay ama loo yeeray ama loo sheegay in baabuurkiisa loo isticmaali doono difaaca, Dhaqaalaha iyo Nabadgelyada Dalka ama tegi waaya ama geyn waaya ama la gees mara xamuul meeshii loo diray, isla markaaba waa la xidhayaa waxaana lagu ciqaabayaa :

b) Haddey diidmadu, dhuumashadu, la geesmarku, geynwaagu ama qarintu ka dhacdo goob dagaal dil (death);

t) Haddey diidmadu dhuumashadu la geesmarku, geynwaagu ama qarintu ka dhacdo meel aan ahayn goob dagaal, ilaa xabsi daa'in (upto life imprisonment). Waxaana awoodda qaadista dembiga sharcigan iska leh Maxkamadda Badbaadada dalka.

2. Baabuurka la diiday, la qariyey ama lala dhuuntay sida ay tilmaameyso xubinta kore ee qodobkani, haddii qofka baabuurka lihi aanu u caddayn si shaki ka fog in aanu ogeyn, amrin, ama raalli ka ahayn diidmada, qarinta la geesmarka, geynwaaga ama la dhuumashada, baabuurka, waa la dhacayaa waxaana loo isticmaalayaa difaaca iyo nabadgelyada dalka iyadoo aan laga bixin wax magdhawshiiya ah ama abaalgud ah.

Qodobka 7aad

DHAQANGELID

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynuhu saxeexo, wuxuuna soconayaa ilaa ay ka dhamaato xaaladda khasabtay dejintiisa.

Muqdisho, 11 Dis. 1977

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNE L. 94 Xeer lagu magacaabay Xubno Guddi.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ahi 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1.7.76;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Guddiga gaar ah ee loo xilsaaray qorsheynta, habeynta iyo ururinta maalka Ummadda Soomaaliyeed ugu deeqayo Jabhadaha Gobannimadoonka Soomaaliyeed lamb. yahay 72 soona baxay taariikhda 12.11.1977.

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ku gaaray Shirkiisa aan caadiga ahayn ee 27.10.1977.

WUXUU XEERAYAA:

Qodobka 1aad

In Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran, qod. 2aad ee Xeerkan, kana tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S. loo doortay iney xubno ka noqdaan Guddiga lagu xusay sharciga lamb. 72 ee soo baxay 12 Nof. 77 iyagoo mid waliba oo ka mid ah ka noqon doono Guddoomiye ama Xubin.

Qodobka 2aad

1) Jaalle S/Guuto Cali Mataan Xaashi — Guddoomiye
2) Jaalle Axmed Maxamed Ducaale — Xubin
3) Jaalle Maxamed Cali Warsame — Xubin

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa ka billaabata 27.10.1977, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.D.S.

Muqdisho, 12.11.77

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre



XEER MADAXWEYNAHA ee 12 Nof. 77 Xeer lagu magacaabay Guddoomiyaha Qorsheynta Qaranka L. 95

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah: 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aankii Golaha Dhexe ee X.H.K.S. uu ku gaaray Shirkii aan Caadiga aheyn ee 27.10.77;

WUXUU XEERAYAA:

Qodobka 1aad

In Jaalle Axmed Xabiib Axmed loo magacaabo jagada Guddoomiyaha Qorsheynta Qaranka.

Qodobka 2aad

Guddoomiyaha Qorsheynta Qaranka wuxuu yeelan doonaa gunno iyo xuquuq la mid ah kan ay qaataan Guddoomiyayaasha X. H. K. S.

Qorsheynta 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa ka billaabato 27.10.77, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 12 Nof. 1977

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER L. 96 MADAXWEYNAHA JDS ee 12 Nof. 77, Xeer lagu Magacaabay Guddoomiyayaal, Hogaanno iyo ku Xigeenno

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. kala ah 1, 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1.7.1976 ee dhisidda iyo la wareegidda xukunka dalka Xisbiga H.K.S. iyo doorashada Madaxweynaha;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 3 ee 13kii Luulyo 1976 ee Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S. iyo doorashada Madaxweynaha;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam yahay 3 ee 13kii Luulyo 1976 ee Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S. iyo beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Shirkii Golaha Dhexe ee X.H.K.S. fadhigiisa aan caadiga ahayn ee 27.10.77.

WUXUU XEERAYAA:

Qodobka 1aad

Jaallayaasha Magacyadooda hoos ku qoran yihiin kana tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S. waxaa loo dhiibay mas'uuliyadda Hoggaannada ay ku agyaaliin magacyadooda iyagoo mid waliba uu ka noqon doono Guddoomiye Hoggaan ama Ku-Xigeen Guddoomiye sida hoos ku tilmaaman:-

1) Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Maxamed — Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka iyo Maamulka Shaqaalaha Xisbiga.

2) Jaalle Axmed Maxamuud Faarax — Guddoomiyaha Hoggaanka Bulshada.

3) Jaalle Maxamed Cali Nuur — Guddoomiye Ku-Xigeenka Hoggaanka Bulshada.

4) Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud — Guddoomiyaha Hoggaanka Dhaqaalaha.

5) Jaalle Cabdiraxmaan Caydiid — Guddoomiyaha Hoggaanka Culuunta Siyaasadda iyo Cilmi Baarista.



6) Jaalle Maxamed Jaamac Xaaji Kore — Guddoomiye Ku-Xigeenka Hoggaanka Culuunta & Cilmi Baarista.

7) Jaalle Xamsa Maxamed Gaadaweyne — Guddoomiyaha Hoggaanka Daafaca iyo Nabadgalyada.

8) Jaalle Cumar Saalax Axmed — Guddoomiyaha Hoggaanka Danwadaagata iyo Cuntada Deg-Degga ah.

9) Jaalle Saalax Maxamed Cali — Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibedda.

10) Jaalle Cumar Salaad Cilmi — Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka ee Golaha Dhexe ee XHKS.

Qodobka 2aad

Guddoomiyaha Hoggaannada iyo Ku-Xigeennada Guddoomiyayaasha Hoggaannada waxay yeelanayaa gunno Xilka iyo Mas'uuliyadda loo dhiibay laguna magacaabay.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 27.10.77 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 12 Nof. 1977.

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 97 Cad dhul Dowladeed la siiyey Cambaro Wardheere Cigaalle - ku yaal Muqdisho - Degmada Wadajir, kuna fadhiya mq. 940,50.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY: Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17.18.19 soo baxay 1da Luulio 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 41 soona baxay: Nofembar 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jannaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Maxamed Sheekh Cusmaan taariikhdeeduna ahayd 28.5.1964 kuna weydiistey dhismaha, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Wadajir, kuna dhacaaya qaybta VI°;

ISAGOO ARKAY: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaanna loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 6967 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 25aad taariikhdeeduna ahayd 12.11.1968;

ISAGOO ARKAY: Boleetada lamb. 240589 ee 4.7.1976, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamed Sheekh Cusmaan uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 1.410./ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 940,50/ loona tiriyay Maxamed Sheekh Cusmaan sida ku cad warqadda ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 6 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;



ISAGOO ARKAY: Qoraal raydka ah (Scrittura Privata) laguna bixiyey xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna ahayd 23.6.1976 laguna diiwaan geliyey Xamar Xafiiska Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee 27.6.1976 qoraal rayd lamb. 352 taas oo MAXAMED SHEEKH CUSMAAN wuxuu siiyay kuna wareejiyey LUL MAXAMED SHEEKH CUSMAAN wuxuu siiyay wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka dhismahiisi ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 940,50/- kuna yaal Degmada Wadajir;

ISAGOO ARKAY: Qoraal ah (Scrittura Privata) laguna bixiyey xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna ahayd 10.7.1976 laguna diiwaan geliyay Xamar Xafiiska Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee 15.10.1977 qoraal rayd, lamb. 1298, taas oo LUUL MAXAMED SHEEKH CUSMAAN wuxuu u hibeysay kuna wareejisay CAMBARO WARDHEERE CIGALLE waxay siisay wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah ku fadhiya mq. 940,50/- kuna yaal Degmada Wadajir;

XEER

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay CAMBARO WARDHEERE CIGALLE oo ku yaal Muqdisho - Degmada Wadajir, kuna fadhiya mq. 940,50/-

Muqdisho, 23 Okt. 1977.

WASIIRKA WASAARADDA H. GUUD

Inj. Maxamed Xawaadle Madar

N U Q U L:

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lamb. Bogga lamb. 31

Muqdisho, 24 Okt.. 1977

Hantidhawrka Guud

W. S.. Cabdillaahi Warsame Nuur.

XEER L. 98 Cad dhul Dowladeed, gadatay Jaalle CANAB XUSEEN WEYD - ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan - Waddada 26ka Juunyo - kuna fadhiya mq. 600.-

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY: Warqaddii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb 6 soona baxay 9 Jannaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii ay keensatay CAASHA MAXAMED taariikhdu markay ahayd 14 juunyo 1973, kuna weydiistay dhismo cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho Dagmada hodan kuna fadhiya mq.600, kuna dhacaaya qaybta VII°;

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka kuna saabsan cad dhul ah, la weydiisty, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1, R. 1 soona baxday 11 Jannaayo 1975 iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 11926 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 1aad taariikhduna aheyd 8.1.1974, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. 127768 ee 28.1.1974 iyo Bolleetada lamb. 158148 ee 28.12.1974 kana soo baxeen Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in CAASHA MAXAMED WARSAME uu bixiyey lacag dhan Sh So. 600/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 600/- loona tiriyay CAASHA MAXAMED WARSAME sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna aheyd 30.12.1974.

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;



ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) lamb. 17513 Reb. taariikh 24ka Agoosto 1975, lagu diiwaan geliyay Xamar 25.8.1975 lamb. 2037 Atti Pubblici Vol. 22, oo ah caddeynta Notayada Dr. Xasan Warsame Cali, taas oo CAASHA MAXAMED WARSAME ka gaday kuna wareejiyay CANAB XUSEEN WEYD wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul Dhismahi ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 600/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Hodan - Waddada 26ka Juunyo;

XEER

Waxaa cad dhul Dowladeed ah gadatay CANAB XUSEEN WEYD oo ku fadhiya mq. 600/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Hodan - Waddada 26ka Juunyo.

Muqdisho, 20 Okt. 1975.

XOGHAYAHA WASAARADDA H. GUUD

Inj. Maxamed Xawaadle Madar

NUQUL

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 30

Hantidhawrka Guud

G.le/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

BOGGA SADDEXAAD

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Xirsi Maxamuud uu soo qortey tey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 31.7.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degamada Hawl-Wadaag qaabkiisuna yahay retaangolo addimihiisuna yihiin 24/13.50 kuna fadhiya 324 Mdh: soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :
Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Xasan Sahal
Galbeed waxaa ka xiga : Waddada Hawl1Wadaag
B a r i waxaa ka xiga : Jid yar

Muqdisho, 1 Nof. 1977

Inj. Caydaruus C. Keenadiid
AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA

L. 665

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulle Diiriye Guuleed uu soo qortey Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 25.5.74 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatn Xamar degmada Hawl-Wadaag qaabkiisuna yahay Afar gees siman addimihiisuna yihiin 27×27 kuna fadhiya 729 Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
B a r i waxaa ka xiga : Waddada Hawl-wadaag

Muqdisho, 1 Nof. 1977

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. 666



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la Cadeeynaya in Jaalle Xasan Sahal Maxamuud uu soo qortey Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 31.7.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hawl-wadaag qaabkiisuna yahay retaangolo addimihiisuna yihiin 24×13.50 kuna fadhiya 324 Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :
Waqooyi waxaa ka xiga : Cali Xirsi Maxamuud
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddada Hawl-wadaag
B a r i waxaa ka xiga : Jid yar

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Nof. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 667

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Awees Sheekh Maxamed uu soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5.10.74 uu ku weydisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan 5° Km. qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 56×22 kuna fadhiya 1232 Mdh. kuna fadhiya 1232 Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :
Waqooyi waxaa ka xiga : Gal. lam. 1688/62
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Gal. lam. 1546/61
B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6.11.77.

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 668

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Axmed Cabdisalaan Caalin Waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 15/5/74 uu ku weeydiisanaayey Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiya 600/- Mdh. Soohdimihiisuna yihiin kuwa sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 30K
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 4K
Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.H. Waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga Bilaabo maalinta lagu soo qoro guugga Faafinta rasmiga ah:

Muqdisho, 6.11.77

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 669

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jaamac Cabdi Faarax uu soo qortey Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka Maalintii Taariikhdu ahayd 25.1.77, uu ku weydiisanaayey Gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid qaabkiisuna yahay Regttangolo Addimihiisuna yihiin 60×50 kuna fadhiya 3000/ Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaan:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed
Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii Daneynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. Waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga Bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta rasmiga ah:

Muqdisho L. 11. 77.

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 670



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la Cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Warsame Faarax uu qortey Arji Waaxdatan dhismaha iyo Dhulka maalintii Taariikhdu ahayd 2.7.77, uu ku weydiisanaayey Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangolo Addimihiisuna yihiin 20×30 kuna fadhiya 600/ Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaan.

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam.0.3
Koonfur waxaa ka xiga: jid
Galbeed waxaa ka xiga: Jid
Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 0,1

Qofkii Daneynayaa Dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. Waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga Bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga faafinta rasmiga ah:

Muqdisho. 6. 11. 77

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 671

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Warsame Guuleed uu soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 21.1.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Yaaq-shiid qaabkiisuna yahay Retaangolo addimihiisuna yihiin (70+50)×30 kuna fadhiya 3600 Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dowladeed
Bari waxaa ka xiga: Waddada 21ka Oktoobar

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6.11.77

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 672

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Kinsi Ibraahim Cismaan uu soo qorteey Arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 24.7.77. uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan aXmar degmada Hodan qaabkiisuna yahay reetaan-golo addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiya 600 Mdh. soohdimi-hiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 444 K

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 443 K

B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 447 K

Jofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naq-shadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee W.H.G. wa-xaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmoo ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6.11.77

L. 673

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Xaaji Maxamed Jaamac uu tey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 16.4.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 20×30 kuna fadhiya 600 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 370

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 373

B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 375

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naq-shadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. wa-xaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qorol Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Nof. 1977.

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 674



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Cali Maxamed Maxamuud uu soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 1.10.1977 uu ku weydiistay gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal ma-gaaladatan Xamar degmada Hawl-wadaag qaabkiisuna yahay Afar gees Addimihiisuna yihiin mt. 13.50×13.50 kuna fadhiya 176,175 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga : Xasan Salaad

Koonfur waxaa ka xiga : Jid

Galbeed waxaa ka xiga : Maxamed Sheekh

B a r i waxaa ka xiga : Sheekh Axmed

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naq-shadda Dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. wa-xaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 12 Nof. 1977.

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 975

MAXKAMADDA DEGMADA GOBOLKA BERBERA

MARKAAN ARKAY: Weydiinta Cabdiraxmaan Jaamac Seed;

MARKAAN ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka;

MARKAAN ARKAY: Qod. D.L. 9.9.65.2.

Waxa cad lumista Buugga Kaydka ee lamb. yahay 1400 kuna qoran tahay Sh. So. 728.33 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera. Waxaana amrayaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Buuggaas aan kor ku soo sheegnay muddo 30 beri (soddon beri) oo ah ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof ka sita awood ama wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 30 beri.

Gud. Maxkamadda G. Degmada Berbera
(Shawqi Cilmi Cali)

Berbera, 1510.77

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga Kaydka L. 12508 oy ku qoran tahay di Sh. So. 3.610./

WAXAY AMRAYSAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Cabdullaahi Xuseen Mayow ama qof isla asaga ka sita wakaalad sraci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 23.11.77.

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
(Cabdullaahi Daahir Barre)



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangig

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Jeegga w reega L. 017818 uu leeyahay Cali Cabdalla Cabduraxmaan.

lacag dhan di Sh. So. 20.000/. Bangiga Ganacsiga Laanta 1aad.

WUXUU AMRAYAA:

In loo cusbooneysiiyo Jeegga wareega ka dib markii ay ka soo wareeg to 30 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmig ah ee dawladda.

In Jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Cali Cabdalla Cabduraxmaan, ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho, 7.11.77.

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. 678

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADDU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga L. yahay 13.153 Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 2aad Lacagta ku qoran di Sh. So. 150.

WUXUU AMRAYAA:

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA:

In Buuggaa cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Sureer Axmed Maxamed ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 15.12.77.

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. 679

## MAXKAMADDA GOBOLKA GALGADUUD

Maxkamadda hadday aragtay Dacwadda kor ku qoran, markay aragtay waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga, hadday arag-tay Q. 69 D.L. 929. 65 N. 2 Lumidda Jeegga lambarkiisu yahay 101283, 5tii Luulyo oo ay ku qoran tahay lacag dhan Sh. So. 700/- (toddoba boqol oo shilin).

## WAXAY AMRAYSAA :

In lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, loona celiyo lacagta ka dib markii ay ka soo wareegto (15) maalmood maalinta Dekreetada lagu shaaciyey Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## WAXAA LA CODSANAYAA :

In lacagta Jeegga ku qoran gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Yaroow Maxamed, ama qof ka sita Wakaalad Sharci ah, iyadoo la su-gaayo muddada (15) (Shan iyo toban maalmood) ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Dh/Mareeb, 26.12.77

GUD. MAXKAMADDA GOB GALGADUUD

Jaalle Maxamed Xasan Maxamed

L. 680